

Sida La isaga Diiwaangeliyo Barnaamijya-da Daryeelka Muddada Dheer ee Medicaid

Family Care, Family Care Partnership, IRIS, PACE

(How to Enroll in Medicaid Long-Term Care Programs
Family Care, Family Care Partnership, IRIS, PACE)



Waxaa jiro barnaamijyo badan oo kaa caawin karo **daryeelka muddada dheer** oo loogu tallogalay kuwa ku nool Wisconsin. **Medicaid** ayaa maalgeliso qaar ka mid barnaamijyada daryeelka muddada dheer (**sidoo kale loo yaqaan barnaamijyada Medicaid waiver (ka dhaafida Medicaid)**), oo ay ku jiraan:

- **Family Care**—kan waa barnaamij loogu tallogalay dadka wayeelka iyo dadka weyn ee naafada ah. Xubnaha waxay ka helaan adeegyada daryeelka muddada dheer ee kala duwan barnaamijka halka faa'ido. Xubnaha Family Care waxay usii isticmaalayaan kaarkooda Medicaid caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka iyo daawooyinka qoraalka ah.
- **Family Care Partnership**—kan waa barnaamij loogu tallogalay dadka waayeelka iyo dadka weyn ee naafada ah. Xubnaha waxay ka helaan daryeelka muddada dheer ee kala duwan, caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka, iyo daawooyinka qoraalka ah barnaamijka halka faa'ido.
- **IRIS Include, Respect, I Self-Direct (Ku dar, Ixtiraam, Aniga Is Hago)**—waa barnaamij is hago ee loogu tallogalay dadka waayeelka iyo dadka weyn ee naafada ah. Ka qeybqaatayaasha ayaa go'aansado alaabahree guriga iyo bulshada ku saleysan, taageerooyinka, iyo adeegyada kaa caawinayo daboolida baahiyahooda iyo yoolalkooda. Iska diiwaangelinta kadib, ka qeybqaatayaasha waxay helaan miisaaniyad lagu isticmaalo alaabahaas, taageerooyinkaas, iyo adeegyadaas.
- **PACE (Program of All-Inclusive Care for the Elderly) (Barnaamijka Loo Dhanyahay ee Daryeelka Waayeelka)**—an waa barnaamij qaran ee loogu tallogalay dadka weyn ee da'da 55 sanno iyo ka weyn. Xubnaha waa inay ku noolaadaan gobolada Kenosha, Milwaukee, Racine, ama Waukesha si ay uga qeybqaataan. Xubnaha waxay ka helaan adeegyada daryeelka muddada dheer ee kala duwan, caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka, iyo daawooyinka qoraalka ah barnaamijka halka faa'ido.

Ogow: Waxaa kaliya oo aad iska diiwaangelin kartaa hal barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid waqtigiba. Dhammaan barnaamijyada waa iqtiyaar. Iqtiyaar waxaa loola jeedaa dooqaaga aad iskaga diiwaangeliso. Waad doortan kartaa inaad ka baxdid barnaamijka waqt walba.

Erayada la ogando

Daryeelka muddada dheer

Kan waa adeega ama taageerada laga yaabo inaad u baahato sababtoo ah hal ama ka badan oo kuwa xiggo:

- Aad tahay 18–59 sanno jir oo waxaad qabtaa naafonimo.
- Aad tahay 65 sanno jir ama ka weyn (55 ama ka weyn oo PACE).
- Aad leedahay xaalad joogta ah oo waarta.
- Aad caawin uga baahantahay howlo maalmeedka, sida labisashada ama qubeyska.

Medicaid

Kan waa barnaamijka gobolka iyo dowlada faderaalka. Barnaamijka wuxuu siiyaa caymiska daryeelka caafimaadka dadka leh daqliga iyo illaha xadidan.

Barnaamijyada Medicaid waiver (ka dhaafida Medicaid) (sidoo kale loo yaqaan barnaamijyada daryeelka muddada dheer ee sida guud loo maalgeliyay)

Kuwaan waa barnaamijyo u ogolaado gobolada inay u isticmaalaan lacagaha Medicaid inay ku bixiyaan adeegyada daryeelka muddada dheer ee guryaha dadka iyo bulshooyinka.



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Tallaabooyinka la isaga diiwaangeliyo

Iska diiwaangelinta barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid waxay qaadan kartaa hal illaa sadex bilood, xaaladaha ugu badan. Nidaamka waxaa ku jiro tallaabooyinkaan:

1. La xiriir ADRC-gaaga ama Tribal ADRS.

ADRC deegaankaaga (aging and disability resource center) (xarunta illaha gabowga iyo naafonimada) ama Tribal ADRS (aging and disability resource specialist) (taqasuska illaha gabowga iyo naafonimada) ayaa kaa caawin karo bilaabida. Waxay kaa caawinayaan inaad wax ka ogaatid dooqyada laguu heli karo iyo sharuudaha la isaga diiwaangeliyo mid ka mid ah barnaamijyadaan. Adeegyada ADRC iyo Tribal ADRS ayaa bilaash u dhammaan dadka ku nool Wisconsin.

- [Ka raadi ADRC Deegaankaaga](#) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm).
- [Ka raadi Tribal ADRS](#) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm).



2. Go'aanso u qalmida shaqada ee shaashada shaqada.

ADRC-gaaga ama Tribal ADRS ayaa kula kulmayo si aad u dhameystirtid shaashada shaqada. Yoolka shaashada waxaa lagu cabirayaa heerkaga baahida adeegyada. Shaashada ayaa sidoo kale go'aamiso haddii dabooshid sharuudaha barnaamijka.

3. Go'aamiso u qalmida dhaqaale ahaan.

Barnaamijyada daryeelka muddada dheer ee Medicaid waxay leeyihiin sharuudo kala duwan oo dhaqaalaga ah. Waxay ku xirantahay haddii aad horaan u heshay ama aadan u helin faa'idooyinka buuxo ee Medicaid:

- **Haddii aad hesho faa'idooyinka buuxo ee Medicaid**, looma baahno inaad dhameystirtid nidaamka codsiga dhaqaalaha. Si kastaba, waxaad u baahaneysaa inaad ka jawaabitid su'aalaha qaar. Su'aalahaan waxay hubiyaan inaad dhaqaale ahaan ugu qalantid barnaamijyada daryeelka muddada dheer ee Medicaid.
- **Haddii aadan helin faa'idooyinka buuxo ee Medicaid**, ADRC-gaaga ama Tribal ADRS ayaa kaa caawin karo dhamesytirk codsiga dhaqaalaha. Waxay kaa caawinayaan inaad la xiriirtid income maintenance agency (hay'ada caawinta dhaqaalaha). Income maintenance agency (Hay'ada caawinta dhaqaalaha) ayaa ka baaran dageyso codsigaaga dhaqaalaha si ay u arkaan haddii aad u qalantid. Sida ku saleysan daqligaaga iyo isticmaaladaada, income maintenance agency (hay'ada caawinta dhaqaalaha) ayaa sidoo kale go'aansaneyso haddii aad ku qasbantahay inaad bixisid qarash wadaaga la isaga diiwaangeliyo barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid. Qarash wadaaga waa cadad bil-le ah oo xubnaha qaar laga yaabo inay ku bixiyaan barnaamijkooda daryeelka muddada dheer ee Medicaid.

(Ku sii soco bogga 3)



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

4. Wax ka baro dooqyada barnaamijkaaga.

ADRC-gaaga ama Tribal ADRS ayaa kula soo xiriirayo. Waxay ku ogeysiinayaan haddii aad dabooshid sharuudaha shaqada iyo dhaqaalaha ee barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid. Waxay sidoo kale kuu sharaxayaan sharuudo walboo barnaamijka ah. Haddii aad u qalantid, waxay kula wadaagayaan barnaamijyada laguu heli karo. Waxay kaa caawinayaan inaad fahamtid dooqyadaan, si markaas ay kugu gaaraan go'aanka ugu fiican. Nidaamkaan waxaa loo yaqaan la talinta diiwaangelinta.

5. Dhameystir Diiwaangelinta.

Haddii aad dooratid inaad iska diiwaangelisid ama laguu gudbiyo barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid, ADRC-gaaga ama Tribal ADRS ayaa kaa caawinayo:

- Dhameystir diiwaangelinta ama waraaqaha gudbinta.
- Ogeysii hay'ada inaad doorato diiwaangelintaada ama gudbinta barnaamijkooda. Iyo sadex maal mood gudahood ee ka bilaabaneysa diiwaangelintaada ama taariqda gudbinta, hay'ada waxay sameyneysaa wacitaanka hore ee taleefonka si ay kuula soo xiriiraan. Waxay kadib kula qorsheynayaan booqashada shaqada si loo qorsheeyo sida loo helo adeegyada iyo taageerooyinka aad u baahantahay.

Qoraalada:



**WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES**